# DASTUURKA KMG EE DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG SOOMAALIYA

# EE GOLAHA SHARCI-DEJINTU ANSIXIYAY JULY 28, 2015

# Tusmada Dastuurka

**Cutubka Kowaad: Mabaadi'da Guud** ... 6

**Qodobka 1aad: Mabaadi'da guud ee aasaasiga ah** ... 6

**Qodobka 2aad: Dhulka Dowlad Goboleedka Galmudug** ... 6

**Qodobka 3aad: Astaanta, Calanka iyo heysta dowlad goboleedka DGGM** ... 7

**Qodobka 4aad: Magaala Madaxda iyo Xarunta DGGM** ... 7

**Qodobka 5aad: Mabaadi'da Aasaasiga ah** ... 7

**Qodobka 6aad: Sarreynta Sharciga** ... 8

**Cutubka Labaad: Xuquuqaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah** ... 9

**Qodobka 7aad: Dhaqangelinta qaanuunka caalamiga ah** ... 9

**Qodobka 8aad: Xaqa Nolosha** ... 9

**Qodobka 9aad: Xaqa Xoriyadda iyo Nabad-galinta** ... 9

**Qodobka 10aad: Xaqa Hoyga** ... 10

**Qodobka 11aad: Xaqa Sinnaanta iyo Cadaaladda** ... 10

**Qodobka 12aad: Xaqa Wax-barashada** ... 10

**Qodobka 13aad: Xaqa Shaqada** ... 11

**Qodobka 14aad: Xaqa Caafimaadka** ... 11

**Qodobka 15aad: Xaqa Daryeelka Qoyska, Haweenka iyo Caruurta** ... 11

**Qodobka 16aad: Xuquuqda Naafada** ... 12

**Qodobka 17aad: Masuuliyadda Ciqaabta** ... 12

**Qodobka 18aad: Xaqa eedeysanaha, dacwada iyo isdifaaca** ... 12

**Qodobka 19aad: Xaqa Dhaq dhaqaaqa iyo Safarada** ... 13

**Qodobka 20aad: Xaqa Cabiraadda fikirka, Hadalka iyo Hal-abuurka** ... 13

**Qodobka 21aad: Xuquuqda Warbaahinta** ... 13

**Qodobka 22aad: Xaqa Hantida Gaarka ah** ... 14

**Qodobka 23aad: Xaqa Deegaanka (Bii'ada)** ... 14

**Qodobka 24aad: Xoriyadda Sameynta Urur Bulsho iyo ka Qeybgal Banaabax** ... 14

**Qodobka 25aad: Xaqa ka qeybgalka Siyaasadda iyo Doorashada** ... 14

**Qodobka 26aad: Waajibaadka Muwaadinka** ... 15

**Cutubka Saddaxaad: Qaab dhismeedka Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM)** ..... 15
**Qodobka 27aad: Fidinta Awoodda maamul ee DGGM** ..... 15
**Qodobka 28aad: Golaha Sharci-dejinta** ..... 16
**Qodobka 29aad: Shuruudaha ka mid noqoshada golaha sharcidejinta** ..... 16
**Qodobka 30aad: Luminta Xildhibaanimada Golaha Sharcidejinta** ..... 16
**Qodobka 31aad: Buuxinta xubnaha baneeya kuraasta golaha sharcidejinta** ..... 17
**Qodobka 32aad: Mudada Golaha Sharci-dejinta** ..... 17
**Qodobka 33aad: Awoodaha Golaha Sharci-dejinta** ..... 17
**Qodobka 34aad: Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada** ..... 17
**Qodobka 35aad: Dhaqangelidda Sharciyada** ..... 17
**Qodobka 36aad: Durid Sharci** ..... 17
**Qodobka 37aad: Gudiyada Golaha Sharci-dejinta** ..... 18
**Qodobka 38aad: Gudiga Joogtada ee Golaha Sahrci-dejinta** ..... 19
**Qodobka 39aad: Kal fadhiyada Golaha Sharci-dejinta** ..... 19
**Qodobka 40aad: Xasaanadda Xildhibaanka Golaha Sharci-dejinta** ..... 20
**Qodobka 41aad: Dhaarta** ..... 20
**Qodobka 42aad: Kala dirista golaha sharci-dejinta** ..... 20
**Qodobka 43aad: Gudoomiyaha iyo ku xigeenadda golaha sharcidejinta DGGM** ..... 21
**Qodobka 44aad: Qaab dhismeedka Golaha Fulinta** ..... 21
**Qodobka 45aad: Madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka DGGM** ..... 21
**Qodobka 46aad: Shuruudaha Musharaxa madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka** ..... 22
**Qodobka 47aad: Doorashada Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug iyo ku-xigeenkiisa** ..... 22
**Qodobka 48aad: La Wareegidda Xilka Madaxweyne** ..... 22
**Qodobka 49aad: Mudada Xilka Madaxweynaha** ..... 22
**Qodobka 50aad: Awoodaha iyo waajibaadka Madaxweynaha DGGM** ..... 23
**Qodobka 51aad: Luminta Xilka Madaxweynaha** ..... 23
**Qodobka 52aad: Xil kaqaadista Madaxweynaha** ..... 24
**Qodbka 53aad: Siihaynta xilka Madaxtooyada** ..... 24
**Qodobka 54aad: Xilka Madaxweyne Ku-xigeenka** ..... 24

**Qodobka 55aad: Golaha fulinta** ........ 25
**Qodobka 56aad: Shuruudaha kamid noqoshada golaha wasiirada** ........ 25
**Qodobka 57aad: Xilka iyo waajibaadka Golaha wasiirada** ........ 25
**Qodobka 58aad: Golaha Guurtida** ........ 26
**Qodobka 59aad: Shuruudaha kamid Noqoshada Golaha Guurtida** ........ 26
**Qodobka 60aad: Tirada Golaha Guurtida** ........ 27
**Qodobka 61aad: Awoodda Iyo Waajibadka Golaha Guurtida** ........ 27
**Qodobka 62aad: Fadhiga ugu Horeeya ee Golaha Guurtida** ........ 28
**Qodobka 63aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Guurtida** ........ 28
**Qodobka 64aad: Garsoorka** ........ 28
**Qodobka 65aad: Qaab-dhismeedka Garsoorka** ........ 29
**Qodobka 66aad: Hawlaha Garsoorka** ........ 29
**Cutubka Afaraad: Hay'adaha iyo Guddiyada Madaxa bannaan** ........ 29
**Qodobka 67aad: Hay'adaha dowliga ee madaxabanaan** ........ 29
**Qodobka 68aad: Gudiyada Madaxabanaan** ........ 30
**Cutubka Shanaad: Ciidamada Nabad Gelyada DGGM** ........ 31
**Qodobka 69aad** ........ 31
**Cutubka Lixaad: Xiriirka Dowlad Gobleedka Gal-mudug iyo JFS** ........ 31
**Qodobka 70aad** ........ 31
**Cutubka Todobaad: Qodobada Xilliga kalaguurka iyo dhaqangalinta dastuurka DGGM** ........ 32
**Qodobka 71aad: Ansaxinta iyo wax-kabedelka Dastuurka DGGM** ........ 32
**Qodobka 72aad: Dhaqangalka Dastuurka DGGM** ........ 32
**LIFAAQYO (ANNEXES) A:** ........ 33

# DASTUURKA DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG (DGGM)

## HORDHAC

Iyadoo laraacayo tilmaamaha iyo faritaanka Qodobka 48aad, 49aad ee Dastuurka JFS iyo go'aankii saxiixayaasha iyo wareegtadii lagu magacaabay Guddiga farsamada maamul sameynta Gobalada dhexe ee ku taariikhaysan 30/07/2014, ayaa waxaa lagu heshiiyay sameyn maamul Gobaleed ka kooban Mudug iyo Galgaduud iyo Dastuur KMG ah oo uu yeelanayo Maamul Gobaleedka Galmudug. Dastuurkaas oo ku saleysan Shareecada islaamka, dhaqanka suuban, nidaam cadaalad, nabad, tala-wadaag, dimuqraadiyad iyo hanaanka xisbiyada badan.

Hadaba Dastuurka KMG Dowlad Gobaleedka Galmudug waa sharciga ugu sareeya shuruucda DGGM sida ku cad mabaadi’da Dastuurka iyo qaab-dhismeedka nidaamka Dowliga ah iyo awaamirta uu tilmaamayo Dastuuka DGGM, waxaana saldhig u ah shareecada Islaamka iyo Dastuurka JFS, waxa uuna

Ku dhisan yahay mabda'a qaybinta awooda sida hay'ada sharci-dajinta, fulinta iyo Garsoorka sidoo kale waxaa saldhig u ah mabda'a aaya ka talinta, ismaamulka iyo sarreynta sharciga si loo xaqiijiyo rabitaanka shacabka DGGM loona gaaro horumar iyo cadaalada bulshada.

# Cutubka Kowaad

## Mabaadi'da Guud

### Qodobka 1aad

### Mabaadi'da guud ee aasaasiga ah

1. Dowlad Goboleedka Galmudug waa dowlad-goboleed ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya "JFS".
2. Bulshada Galmudug waa Muslim Sunni ah, lagumana faafin karo diin kale oo aheyn diinta muslimka suniga ah.
3. Dastuurka Dowlad Goboleedka Galmudug waxaa saldhig u ah shareecada islaamka iyo Dastuurka JFS, wixii ka hor imaanayana waa waxba kama jiraan.
4. Dowlad goboleedka Galmudug, waxa ay ku dhisantahay rabitaanka shacabka Gobolada Mudug iyo Galgaduud.
   A. Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM) waxay u madax-bannaantahay ismaamuliddeeda gudaha, si waafaqsan Dastuurka JFS, Qodobada 48aad iyo 49aad.
   B. Awoodda maamulka DGGM waxaa leh dadweynaha Gobolada Galgaduud iyo Mudug, waxa ayna u wakiilanayaan wakiiladooda ay ku soo doorteen hannaanka dimuqraadiga xisbiyada badan si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda doorashooyinka DGGM.

### Qodobka 2aad

### Dhulka Dowlad Goboleedka Galmudug

1. Dhulka DGGM waxa uu ka koobmaa Gobolada Galgaduud iyo Mudug, (Biya badeedka, Berriga iyo hawada sare).
2. DGGM waxa ay dib-u-eegis iyo qiimeyn ku sameyneysaa deegaannada Galgaduud iyo Mudug, si waafaqsan Dastuurka JFS, waxaana la sameynayaa nidaam sharci oo lagu dhisayo gobollo, degmooyin iyo xuduudahooda.
3. Dhismayaasha Gobolada iyo degmooyinka cusub waxaa soo je DGGM waxaana ansaxinaya golaha sharci dejinta DGGM.

4. Soohdimaha dhul ee DGGM , Waqooyi waxaa ka xiga Puntland, Bari waxaa ka xiga Xeebta badweynta hindiya, Galbeed waxaa ka xiga xadka dalka Itoobiya, Koonfur waxaa ka xiga Gobolada Hiraan iyo Shabeeleda dhexe.
5. Xuduudaha Gobolada waxaa si kumeel -gaar ah loogu dhaqmayaa xuduudihii Gobolada dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya, sida ku cad soohdimaha xuduudihii jiray dowladdi dhexe ee Soomaaliya ka hor 1990 ay ku kala calaamadeysay Gobolada jamhuuriyadda Soomaaliya sida ku qeexan qodobka 49aad faqrada 5aad ee DJFS.
6. Khilaafaadka xuduudaha, waxa lagu xalinayaa talo-soo-jeedinta Gudiga madaxabanaan ee xuduudaha iyo federaalka JFS sida ku cad dastuurka JFS qodka 111Eaad faqradiisa 5aad.
7. DGGM waxa ay soo dhaweyneysaa Gobolkasta ama deegaan ay deganyihiin bulsho cayiman aqlabiyadda shacabkeeduna ay doonayaan in ay la midoobaan DGGM si ku dhisan is afgarad iyo heshiis aan wax loogu dhimeynin dowladgoboleed kale islamarkaana ka hor imanaynin Dastuurka JFS.Qodobkiisa 49aad, faqradiisa 6aad.

## Qodobka 3aad

## Astaanta, Calanka iyo heysta dowlad goboleedka DGGM

1. Astaanta u gaarka ah DGGM waa mida ku qeexan lifaaqa (A.).
2. Calanka DGGM waa midka ku qeexan lifaaqa (A.).
3. Calanku waxa uu yeelanayaa hees u asteeysan, heesta calanka waxaa ansaxinaya Golaha Sharcidejinta ee DGGM.

## Qodobka 4aad

## Magaala Madaxda iyo Xarunta DGGM

1. Magaala Madaxda Dowlad Goboleedka Galmudug waa Dhuusa Mareeb.
2. Magaalo-madaxda DGGM waxa ay yeelaneysaa nidaam gaar ah oo lagu dhaqo waxaana xeer ka soo saarayo golaha sharci dajinta Galmudug muddo 180 maalin gudahooda.
3. Magaalo-madaxyada Gobolada DGGM waxa ay yeelanayaan nidaam u gaar ah oo ka duwan Kan Magaalo-Madaxada iyo xarunta DGGM.

## Qodobka 5aad

## Mabaadi'da Aasaasiga ah

1. Dowlad goboleedka Galmudug waxa uu ku saleysanyahay hannaan nidaam demoqoraadiyad ku dhisan matalaada dadweynaha, awooda oo dhan waxaa leh shacabka, waana hannaan ku saleysan nidaamka axsaabaha badan iyo cadaalad bulshadeed ee loo wada dhanyahay.
2. DGGM waxa ay hirgalineysaa mabaadi'da qeybinta awoodda; waxaa jirayo saddex awoodood oo siman, hadaf mideysan leh isna dhameystirayo; wadashaqeyntoodana ay ku dhisantahay daah furnaansho iyo islaxisaabtan , saddaxdaas awood oo kala ah :

a) Awoodda sharci dejinta

b) Awoodda fulinta

c) Iyo Awoodda garsoorka,

3. DGGM waxa ay hirgelinaysaa xuquuqda aadanaha, kaladambeynta sharciga, xeerarka caalamiga, caddaalad, wadatashi siyaasadeed oo bulshadu u wada dhantahay iyo qeybinta sadaxda awoodood, taasoo looga golleeyahay in la helo hannaan daah furan si loo daryeelo danta guud ee shacabka DGGM.
4. Haweenka waa in si buuxda looga qeybgaliyaa dhammaan hayadaha la soo doorto ama lasoo xulo ama la magacaabo ee saddexda awooddood ee DGGM iyo Heyadaha dowliga ah iyo Guddiyada madaxabanaan, waa in ay Haweenka ku yeeshaan saami 30%.

## Qodobka 6aad

## Sarreynta Sharciga

1. Sharciga ayaa ka sareeyo qofkasta, dhammaan hay'adaha dowladda iyo masuuliyiinta DGGM waxay u wada hogaansamayaan dastuurka iyo shuruucda JFS iyo dastuurka iyo shuruucda DGGM.
2. Shareecada kasa koow Dastuurka DGGM ayaa ugu sareeyo shuruucda dowlad-goboleedka Galmudug , sharci lagu badali karo, lagu laali karo ama lagu jabin karo ma jiro, sharci kasta oo ka hor imaanaya dastuurka DGGM waa waxba- kamajiraan marka laga reebo sharciyada waafaqsan Dastuurka JFS .

3. Dastuurka DGGM waxa uu dhaqangalin siinayaa, una hogaansamayaa Dastuurka JFS iyo shuruucda JFS.
4. DGGM waxa ay sameyneysaa sharciyo laga hirgaliyo deegaannadeeda oo u gaar ah DGGM, shuruucdaas oo aan ka horimaankarin shuruucda JFS.

## Cutubka Labaad

### Xuquuqaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah

### Qodobka 7aad

### Dhaqangelinta qaanuunka caalamiga ah

1. DGGM waxay aqoonsantahay dhaqangalineysaana Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda aadanaha, Qaanuunka caalamiga ah, heshiisyada, hab maamuus la aqoonsanyahay iyo qodobada cutubka labaad ee dastuurka JFS uu ku xusayo xuquuqaha aasaasiga ah ee muwaadinka.
    a) Xuquuqaha ku cad Cutubka Labaad ee dastuurka DGGM ilaalintooda iyo dhaqangalintoodu waa masuuliyad saaran dhammaan heerarka maamul ee DGGM, maamullada Gobolada iyo degmooyinka.
    b) DGGM waxa ay awood dhaqan-galin sharci siineysaa dhamaan xuquuqaha dastuurka JFS uu siiyey muwaadinka iyo qofka sida ku cad cutubka labaad Qodobka 10aad ilaa 35 aad.
    c) DGGM, waxa ay dhaqan-galin siineysaa shuruucda caalamiga iyo Axdiyada caalamiga, iyo kuwa heer gobol ee JFS dhinac ka tahay, baarlamaanka soomaaliyana dhaqangalin siiyay.

### Qodobka 8aad

### Xaqa Nolosha

Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay nolol iyo in loo dhowro xaqa noloshiisa.

### Qodobka 9aad

### Xaqa Xoriyadda iyo Nabad-galinta

1. Qofkastaa waa xor, waxa uuna xaq u leeyahay madaxbannaanida xoriyaddiisa shaqsiga ah, qofna lama adoonsankaro lamana lahaan karo, lagumana shaqeysan karo si sharcidarro ah.

2. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay xoriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabad-galyada qofnimadiisa.

a) Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo amni uu ku noolaado iyo nabad galinta qofnimadiisa iyo kaamil-ahaanshaha jirkiisa, waxaa reeban jirdil iyo ciqaab xaasidnimo
b) Waxaa reeban gudniinka fircooniga ee Gabdhaha balse waxaa banaan Sunna gudida Gabdhaha.
c) Soo tuuridda ilmaha uurka ku jira waa ay reebantahay, marka laga reebo xaalad caafimaad oo uu xaqiijiyay dhaqtar lagu kalsoonyahay laguna badbaadinayo nolosha hooyada.

**Qodobka 10aad**

**Xaqa Hoyga**

1. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo hoy u gaar ah iyo xurmada hoygiisa.
2. Qofna hoygiisa laguma xad gudbi karo, lama gali karo amar la'aan sharci la'aanna lama baari karo, Haddii aan amar cad laga wadan maxkamadda awoodda u leh soo saaridda amarka ee heer DGGM ama JFS.
3. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay arimihiisa gaarka u ah in aan laga faragalin wixii aan ka hor imaaneyn shareecada islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed.

**Qodobka 11aad.**

**Xaqa Sinnaanta iyo Cadaaladda**

1. Muwaadiniinta DGGM waa ay simanyihiin iyadoon loo eegin jinsi, abtirsiimo, midab, luuqad, muuqaal, fikir, siyaasad iyo xaalad gaara oo qof ama bulsho ku sugantahay.
2. Shacabka DGGM, waa shacab siman, si simanna ugu wada noolaanaya dhulka iyo nidaamka DGGM, ugana wada faa'iideysanaya kheyraadka dhulka si siman oo waafaqsan shuruucda DGGM iyo JFS.
3. Xaqa sinnaanta iyo Cadaaladda, Shacabka DGGM waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan caddaalad ay u simanyihiin, garsoor caadil ah sharciga hortiisana ay u sinnaadaan, sidaas si la mid ahana shaqada iyo ka faa'iideysiga kheyraadka.

## Qodobka 12aad

## Xaqa Wax-barashada

1. Muwaadinkasta oo DGGM ka tirsan, waxa uu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho tayo leh, wax-barashada dugsiyada Hoose/Dhexe iyo Sare waa lacag la'aan.

## Qodobka 13aad

## Xaqa Shaqada

1. Muwaadiniinta DGGM, waxa ay xaq u leeyihiin shaqo in ay helaan iyo mushaar u dhigmo, islamarkaana wax u dhimeynin sharaftooda.

a) Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu shaqeeyo, loogana faa'deysan si xaq daro ah muruqiisa.
b) Qofkasta oo shaqaale ah waxa uu xaq u leeyahay in uu sameeyo urur shaqaale ama ka mid noqdo ururrada shaqaalaha.
c) Qofkasta oo shaqaale ah waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo bannaanbax ama kaqeyb qaato abaabul banabax si nabad ah.
d) Dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenku waxa ay yeelanayaan xuquuq gaar ah oo lagu dhowrayo sharaftoodasi aan loogu sameyn ku xadgudub jinsiyadeed gudashada waajibaadkooda shaqo.

2. DGGM waxa ay soo saareysaa sharciga shaqada iyo shaqaalaha, kaasoo aan ka horimaaneynin Dastuurka iyo sharciga shaqada iyo shaqaalaha JFS.

## Qodobka 14aad

## Xaqa Caafimaadka

Muwaadiniinta DGGM waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan adeeg caafimaad oo tayo leh iyo in loo fidiyo adeeg caafimaad xiliyada xaaladaha deg dega ah iyo adeeg caafimaad gaarah oo loo fidinayo naafada iyo saboolka, adeegaas oo u qalma adeegga ay helaan muwaadiniinta soomaaliya meelkasta oo ay joogaan.

## Qodobka 15aad

## Xaqa Daryeelka Qoyska, Haweenka iyo Caruurta

1. Xanaanada hooyada iyo caruurtu waa waajib sharci saaran DGGM

   a) Waalidka waxaa saaran daryeelka, bar-baarinta iyo waxbaridda caruurtooda.
   b) Qofka qaangaarka ah waxaa ka saaran waajib xannaaneynta waalidkiisa haddii waalidku is kaabi Karin sababo caafimaad, dhaqaale ama gabow.
   c) Qoysku waxa uu ka dhismaa lab iyo dheddig ku heshiiya guur si waafaqsan sharciga Islaamaka.
   d) Guurku sharci ma noqonayo haddii aaney labada dhinac midkood raali aheyn ama midkood uusan gaarin da'da guurka, si waafaqsan shareecada islaamka.
   e) Caruurta waa in loola dhaqmaa si waafaqsan qodobka 29aad ee dastuurka JFS iyo xeerarka caalamiga ah ay JFS dhaqangalin awoodeed siisay.

## Qodobka 16aad

## Xuquuqda Naafada

1. DGGM waxay muhiimad sare siineysaa daryeelka naafada iyo in aan lagu xadgudbin xuquuqdooda aasaasiga ah.
2. DGGM waxa ay naafada u sameyneysaa daryeel caafimaad, xannaano, wax-barasho, bixin qalabyo casri ah iyo xirfado ay ku shaqeystaan naafada, islamrahaantaana waxay u abuureysaa fursado shaqo ay ku shaqeystaan.

## Qodobka 17aad

## Masuuliyadda Ciqaabta

1. Masuuliyadda ciqaabta waa shakhsi, qofna looma ciqaabi karo fal-dambiyeed uu geystay qof kale, waxaa reeban masuuliyad ciqaab wadareed lagu muteysto iyo ciqaab xaasidnimo.
2. Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay sharcigu dembi uusan u aqoon, qofna laguma xakumi karo ciqaab aan lagu tilmaamin sharciga.

## Qodobka 18aad

### Xaqa eedeysanaha, dacwada iyo isdifaaca

1. Qofkastaa waa bari' (dambi laawe), edeysanuhu waa Bari' dambi laawe ah ilaa maxakamad si Kama dambeys ah ugu xukunto dambiile.
2. Qofkasta oo xoriyadiisa laga qaado Lana xiro, waa in 24 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwaddiisa, waana in sida ugu dhaqsiyaha badan loogu sheego waxa lagu soo eedeeyay.
3. Qofkasta ee la xiro waxa uu xaq u leeyahay in wargalin loogu sameeyo shakhsiyaadka uu dalbo, turjibaan, daryeel cafimaad, dhaqtar, qareen iyo maxkamad awood qaanuun u leh dhageysiga dacwaddiisa, garsoor caadil ah iyo hannaan dacwo qaadis dhameystiran.
4. Dacwad baaristeedu 60 maalin kabadan socon kartaa ma jirto, haddii eedeysanaha lagu cadeyn waayo dambiga waa in galka dacwada la xiro eedeysanahana la sii daayo, hadii hayadaha amniga danaynaya in ay hayaan eedeysanaha waqti mudadaas ka badan waa in ay horgeeyaan garsoorka sababo maangal ah .
5. Muwaadinka DGGM ee aan awoodin in uu u yeerto wakiil sharci oo difaaca, waxaa uu xaq u leeyahay in loo qabto qareen maxkamada horteeda ka difaaco.
6. Qofkastaa xoriyadiisa laga qaado waxa uu xaq u leeyahay in lagu xiro goob ku haboon nolosha aadanaha, kana helikaro biyo, cunto, hooy iyo akhbaaraad.
7. Qofkasta oo xoriyaddiisa laga qaado waxa uu xaq u leeyahay in uu iska difaaco eedeymaha loo soo jeediyo iyo cadeymaha la soo hordhigo, qofna laguma qasbi karo dambi-qirasho.
8. Qofkasta oo dacwad lagu oogaa waxa uu xaq u leeyahay xuquuqaha ku xusan qodobka 18aad ee dastuurka DGGM.

## Qodobka 19ad

### Xaqa Dhaq dhaqaaqa iyo Safarada

1. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu u safro halka uu doono, kuna soo noqdo hoygiisa marka uu doono islamarahaantaana uu doorto in uu dago halka uu doono, sida ku xusan qodobka 21aad ee dastuurka JFS.
2. DGGM waxa ay muwaadinkeeda u sahlaysaa helidda Dokuumenti sharci uu ku safro in uu ka qaato deegaankiisa, documenti ka soo baxayo JFS.

**Qodobka 20aad**

**Xaqa Cabiraadda fikirka, Hadalka iyo Hal-abuurka**

1. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay cabiraadda fikirkiisa, hadal jeediyo, hal abuurna sameeyo lamana xadeynkaro.
2. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyhay in uu ka hadlo aragtidiisa meel fagaaro ah, war-baahin, ku qoro wargeys, ku daabaco buug ama ka soo saaro riwaayad ama filim ama warbaahinta elektroonikada ah.
3. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay soo bandhigidda hal-abuur aan wax loogu dhimeyn, shaqsi, koox ama bulsho.

**Qodobka 21aad**

**Xuquuqda Warbaahinta**

Qofkasta waxa uu xaq u leeyahay in uu sameysto war-baahin gaar ah ama ka hadlo war-baahin isagoo aragtidiisa ka jeedinaya ama ka difaacaya, war-baahinta lama xadidi karo tiradooda iyo hannaanka shaqadooda, iyadoo la raacayo si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda DGGM iyo JDFS.

**Qodobka 22aad**

**Xaqa Hantida Gaarka ah**

1. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho hanti u gaar ah, isticmaalo, ku raaxeysto iska gado ama wareejiyo si waafaqsan Dastuurka JFS qodobkiisa 26aad.
    a. DGGM waxa ay la wareegi kartaa hanti gaar ah, haddii ujeedadu tahay danta guud ee DGGM iyo JFS.
    b. Qofkasta oo hantidiisa ay la wareegto DGGM ama JFS iyadoo la raaceyo danta guud waa in uu helaa magdhow caadil ah oo ay soo qiimeeyaan guddi xeel-dheereyaal ah, maxkamad ama DGGM iyo JFS isku waafaqaan.

**Qodobka 23aad**

**Xaqa Deegaanka (Bii'ada)**

1. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay bii'ad nadiif ah oo aan waxba u dhimeynin caafimaadkiisa iyo in laga ilaaliyo bii'ad wasqaysan.
2. Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu qeybtiisa ka helo kheyraadka DGGM, islamarkaana lagu xadgudbin lana khasaarinin kheyraadka deegaanka.
3. DGGM waxa ay soo saareysaa nidaam sharci lagu dhowro bii'ada kaas oo aan ka horimaankarin sharciga bii'ada JFS.

**Qodobka 24aad**

**Xoriyadda Sameynta Urur Bulsho iyo ka Qeybgal Banaabax**

1. Muwaadinkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro urur bulsho si waafaqsan sharciga ama uu xubin ka noqdo.
2. Muwaadinkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo kulan kana qeyb galo, umana baahno ogolaansho xukuumadda sida ku cad qodobka 20aad ee dastuurka JFS.
3. Muwaadinkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo ama ka qeyb qaato bannaanbax.

**Qodobka 25aad**

**Xaqa ka qeybgalka Siyaasadda iyo Doorashada**

1. Muwaadin kasta wuxa uu xaq u leeyahay in uu ka qaybgalo hawlaha siyaasadeed heer dowlada DGGM ama heer JFS, Xaqa siyaasadda muwaadinka lama xadeyn karo lama laalli karo.
2. Muwaadinkastaa waxa uu furan karaa xisbi siyaasadeed ama xubin ka noqon karaa isagoo raacayo shuruucda DGGM iyo JFS.
3. Muwaadinkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu wax doorto ama la doorto si waafaqsan sharciga doorashada heer DGGM, ama heer JFS.
4. DGGM, waxa ay soo saareysaa sharciga xisbiyada siyaasadda iyo sharciga doorashada ee heer DGGM.

**Qodobka 26aad**

**Waajibaadka Muwaadinka**

1. Waxaa waajib ku ah muwaadinka ku nool DGGM ilaalinta nidaamka iyo shuruucda DGGM iyo JFS, ka qeyb qaadashada xasilinta amaanka iyo deganaashaha deegaanka iyo horumarinta dhaqaalaha DGGM.
2. Muwaadinka waxaa waajib ku ah dhowrista sharciyada iyo xeerarka DGGM iyo JFS.
3. Muwaadinka waxaa waajib ku ah bixinta canshuuraha DGGM iyo JFS.
4. Muwaadinka waxaa waajib ku ah difaaca dalka, diinta iyo dadka iyo bixinta tabarucaadka looga baahdo.



# Cutubka Saddaxaad

## Qaab dhismeedka Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM)

### Qodobka 27 aad

### Fidinta Awoodda maamul ee DGGM

1. Awoodda maamul ee DGGM waxaa lagu baahinayaa gobolada, degmooyinka iyo tuuloyinka; waxaa jirayo Gole sharcidejin iyo Xukuumadda DGGM iyo maamulo Gobol oo yeelanayo Gudoomiye Gobol oo la soo doorto iyo dowlad hoose iyo maamul degmo oo yeelanayo Gudoomiye la soo doortay.
2. Heer kasto ee deegaan waxa uu yeelanayaaa maamul ku imaanaya doorasho xor ah, ku saleysan nidaam axsaabo badan, shacabka ay soo dooranayaan wakiilo matalo oo lagu soo doorto si xor xalaal ah, codeyn qarsoodi ah.
   a) Gobolka waxa uu ka koobmaa gobol, degmooyin, tuulooyin iyo daabiyado, awoodda ismaamulidda waxa la gaarsiinayaa heer ay daabiyadda soo doorato wakiiladeeda matalaya.
   b) DGGM, waxaa laga hirgalinayaa nidaamka dimuqraadiga ee xisbiyada badan (multi-party system), oo lagu dooranayo hogaaminta DGGM, Gudoomiyaha Gobolka , golaha fulinta Gobolada iyo dowladaha hoose sida ku xusan qodobka 1aad faqradiisa 1aad ee dastuurka JFS
   c) Nidaamka iyo shuruucda maamulka Gobolada iyo degmooyinka ku dhismayaan waxa lagu soo saarayaa sharci gaar ah.

### Qodobka 28 aad

### Golaha Sharci-dejinta

1. Golaha Sharcidejinta DGGM ayaa masuul ka ah Sharci-dejinta DGGM, awooddeeda xileedna waa sharci-dejin iyo kormeeridda xukuumadda.
2. Golaha Sharci-dejinta wuxa uu ka kooban yahay 89 Sideetan iyo Sagaal xildhibaan, Xildhibaannada waxaa soo dooranayo shacabka DGGM.

### Qodobka 29aad

### Shuruudaha ka mid noqoshada golaha sharcidejinta

Xildhibaannimada Golaha Sharcidejinta ee DGGM waxaa loo dooran karaa muwaadin kasto

DGGM degan ee buuxiyay shuruudaha doorashada sida:

1. In uu muslim yahay  diintanna ku dhaqmo
2. In da'diisu ka yareen 25 sano kana weyneyn 75 sano.
3. In uu maskax ahaan caafimaad qabo.
4. In uu yahay soomaali deggen deegaannada Galmudug, udhashay ama kasoo jeedo lehna xuquuqda codaynta.
5. In aan lagu xukumin ciqaab dambiyo culus.
6. Iyo In aaney aqoontiisu ka yareyn heer dugsi sare ama Aqoon iyo waaya aragnimo aan ka yareyn 5 sano.

## Qodobka 30 aad

## Luminta Xildhibaanimada Golaha Sharcidejinta

Xildhibaanku waxa uu xilkiisa ku weyn karaa xaaladaha soo socdo:

1. Haddii uu Iska casilo xilka xildhibaannimada.
2. Haddii Uu geeriyoodo xildhibaanku.
3. Haddii Uu beelo maskaxda ama xanuun aan lala shaqeynkarin uu ku yimaado.
4. Haddii Uu qabto xil wasiir/xigeen ama wasiir dowlo? Waa option
5. Iyo sababaha kale ee uu tilmaamo xeer hoosaadka golaha sharci-dejinta DGGM.

## Qodobka 31aad

## Buuxinta xubnaha baneeya kuraasta golaha sharcidejinta

Golaha sharcidejinta DGGM marka uu ka banaanaado xil kursi xildhibaan sida ku cad qodobka 30aad ee dastuurka DGGM   waa in doorasho loogu galo mudo 60 cisho gudaheeda.

## Qodobka 32aad

## Mudada Golaha Sharci-dejinta

1. Muddo xileedka golaha sharci-dejintu waa 4 sano ka bilaabata marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, lana dhaariyo xildhibaanada.
2. Fadhiga kowaad ee golaha waa in lagu qabto   7 casho gudahooda kadib ku dhawaaqidda natiijada.
3. Muddo xileedka golaha sharci-dejinta lama kordhin karo.

## Qodobka 33aad

## Awoodaha Golaha Sharci-dejinta

1. Golaha Sharcidejinta xilkooda waajibaad waa:
   a. Diyaarinta, ka doodista iyo ansaxinta sharciyada DGGM.
   b. Wax ka beddelidda Dastuurka DGGM marka laga reebo qodobada aasaasiga ee ku xusan Cutubka kowaad iyo cutubka labaada ee xuquuqul insaanka.
   c. Doorashada iyo xil ka qaadidda guddoonka golaha.
   d. Doorashada iyo xil ka qaadidda Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa.
   e. U codeynta guddiyada joogtada ah iyo kala laabashada codka.
   f. Waxa ay ansixiyaan barnaamijka iyo xukuumadda uu soo magacaabay madaxweynaha si cod hal-dheeri ah
   g. Ka doodista iyo ansixinta miisaaniyadda sanadka iyo meelmarinta xisaab-xir sannadeedka.
   h. Ansaxinta ama laalidda xaalad deg deg oo ay xukuumaddu ku soojeedisay
   i. Ka doodista iyo ansaxinta hindiso sharciyeedyada xukuumadu soo qadinto.
   j. Ka doodista iyo ansaxinta motion golaha laga keeno guddoonka golaha sharci-dejinta iyo madaxweynaha DGGM.
   k. U codeynta ama diidmada ansaxinta dhismo deegaano cusub.
   l. U codeynta ama diidmada Haya'adaha dowliga ee madaxa banaan iyo Guddiyada madaxa banaan.
   m. La xisaabtanka xukuumadda, kormeeridda, baarista iyo wax-weydiimo hay'adaha xukuumadda iyo Hay'adaha madaxa banaan iyo Gudiyada madaxa banaan.
2. Golaha sharcidejintu waxa ay amri karaan in baaris lagu sameeyo hey'ad dawladeed iyadoo waajibaadkaas u xilsaarayso guddi xildhibaanooo khibrad u leh howlaha la baarayo.

## Qodobka 34aad.

## Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada

Kaydka sharciyada Dawladda waxaa mas'uul ka ah xoghayaha Golaha Sharci-dejinta DGGM iyo Garyaqaanka Guud ee Dawlad Gobaleedka Galmudug oo faafinta rasmiga ah ku samaynaya

**Qodobka 35aad.**

**Dhaqangelidda Sharciyada**

1. Hindise sharci qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta, Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga.
2. Haddii Golaha Sharci-dejinta Dowlad Gobaleedka Galmudug diido hindise sharciyeed, hindise haasi laguma soo celinkaro Golaha muddo 30 malmood laga bilaabo maalinta hindisaha la diiday.

**Qodobka 36aad.**

**Durid Sharci**

1. Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada iyo dhaqangeliddaba waxaa lagu duri karaa oo keliya inuu ka soo horjeedo Dastuurka.
2. Sharci maray shuruudaha ku xusan Qodobadaan waxaa duri kara:
    a. Saddax meelood meel ka mid ah xildhibaannada Golaha Sharci-dejinta
    b. Golaha Wasiirrada DGGM;
    c. Ugu yaraan laba kun (2,000) oo cod bixiye oo diiwaangashan.
3. Duridda sharci si waafaqsan faqradaha 1 iyo 2 ee qodobkan waxaa la horgeyn karaa go’aanna ka gaari karta Maxkamadda Dastuuriga ee Federaalka oo keliya
4. Haddii Maxkamadda Dastuurigu ay jebiso duriddii sharciga, kharashka ku baxay waxaa bixinaaya dhinacii hindisaha duridda Maxkammadda Dastuuriga hor- keenay
5. Habraaca loo marayo duridda iyo go’aan-ka-gaarista waxaa lagu qeexaa nidaamka garsoorka ee heer Federaal.

**Qodobka 37aad**

**Guddiyada Golaha Sharci-dejinta**

1. Golaha sharci-dejinta waxa uu yeelanayaa guddiyo wada howlaha Golaha sharci-dejinta.
2. Guddiyada tiradooda iyo habka xulistooda iyo nidaamkooda shaqada waxaa lagu qeexayaa xeer-hoosaadka golaha sharci-dejinta.

## Qodobka 38aad

## Guddiga Arrimaha Golaha

1. Golaha sharcidejinta waxa uu yeelanayaa guddiga Arrimaha Golaha, xubnaha guddiga Arrimaha Golaha waa guddoomiyaha, kuxigeennadiisa iyo Guddoomiyaasha guddiyada Joogtada ah.
2. Guddiyada Joogtada golaha waxa ay ku sameysmayaan baahida shaqo ee Golaha.
3. Guddiyada Joogtada golaha waxaa soo jeedinayo gudoonka golaha, waxaana codka kalsoonida loo weydiinayaa Golaha.

## Qodobka 39aad

## Kal fadhiyada Golaha Sharci-dejinta

1. Golaha sharci-dejinta xilkiisa waajibaad waxa uu ku gudanayaa kalfdiyada golaha.
2. Golaha sharci-dejinta waxa uu isugu yimaaddaa kalfadhi caadi ah sanadkii labo mar oo min 4 bilood ah, iyo fadhiyo aan caadi aheyn.
3. Golaha sharci-dejintu waxa uu sameysanayaa xeer-hoosaad uu ku guto xilkiisa waajibaad, anshaxa xubnaha golaha, waqtiga fasaxyada, nidaamka maamul ee golaha , soojeedinada hindiseyaasha sharci, mowshin “motion,” habka codeynta iyo kalfadhiyada.
4. Kalfadhiyada Golaha sharci-dejintu waxa uu ku ansaxmaa labo meelood meel hal dheeri ah in ay fadhiyaan.
5. Golaha sharci-dejintu go’aanadooda waxay ku meelmariyaan cod aqlabiyad hal dheeri ah 50+1 (simple majority) ee xubnaha fadhiyo marka laga reebo qodobada fadhiyada ku saabsan kalsooni siin ama kala noqosho xukuumada iyo mowshinada ku saabsan xaaladaha deg deg.
6. Kalfadhiyada golaha waxaa looga yeerikaraa xubnaha xukuumada ayagoo warbixin looga dhageysanayo ama su’aalo lagu weydiinayo, ama ay ka soo jeedinayaan qorshaha miisaaniyada xukuumada ama hindiso sharci.
7. Kalfadhiyada golaha sharcidejinta waxay albaabada u furanyihiin warbaahinta haddii aan gudoonka goluhu hakin, muwadiniinta waxay dalban karaan waqtiyo mucayin ah in ay dhageysi u tagaan doodaha golaha sharcidejinta. .
8. fadhi aan caadi aheyn waxaa isugu yeeri karo :
   a. Gudoomiyaha golaha sharcidejinta;

b. marka Uu dalbado madaxweynaha DGGM, ama;

c. Ay dalbadaan saddex meelood meel golaha sharcidejinta

**Qodobka 40aad**

**Xasaanadda Xildhibaanka Golaha Sharci-dejinta**

1. Xildhibaanka golaha sharci-dejinta lama xirikaro, lama baarikaro hoygiisa, gaarigiisa, xafiiskiisa iyo dokumentigiisa illaa lagala tashado gudoonka baarlamaanka iyo garyaqaanka guud ee dowlada.
   a) Xildhibaanka Sharci-dejinta DGGM looma dabagali karo fikir ama codka uu ka hordhiibto golaha sharci-dejinta
   b) Xildhibaanka dacwad faldambiyeed laguma oogi karo illaa laga qaado xasaanadda xildhibaannimo, xildhibaanka waa lagu oogi karaa dacwad madani ah.
   c) Xildhibaanka laga qaado xasaanaddiisa ee lagu oogay dacwad ciqaabeed laguna waayo, waxaa uu yeelanayaa magdhaw u qalanto sharafta laga qaaday iyo in uu xildhibaanimadiisa sii wato.
   d) Xildhibaanka lagu xukumo dambi ciqaab si kama dambeys ah; waxa uu weynayaa xilka xildhibaannimada, isla maalinta xukunku dhaco, guddoonka waa in ay ku wargaliyaan in kursigaa loo soo tartamo.

**Qodobka 41aad**

**Dhaarta**

1. Xildhibaanada, Madaxweynaha, Madaxweyne kuxigeenka iyo Xubnaha Xukuumadda waxaa lagu dhaarinayaa Kitaabka Quraanka Kariim ka ah, isagoo dhahayo, “waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahey in aan xilkeyga u gudanayo si daacad ah oo danta diinta, dadka iyo dalka ku jirto, dhowrayana dastuurka DGGM iyo kan Qaranka iyo shuruucaha kale ee dalka”.
2. dhaarta waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee DGGM.

**Qodobka 42aad**

**Kala dirista golaha sharci-dejinta**

Golaha sharci-dejinta waxaa la kala dirikaraa oo kaliya marka uu dhamaado muddada xilka 4 sano dhamadkeeda.

**Qodobka 43aad**

**Gudoomiyaha iyo ku xigeenadda golaha sharcidejinta DGGM**

1. Golaha sharcidejinta DGGM waxa uu yeelanayaa gudoomiye iyo gudoomiye kuxigeenno

2. Xilka gudoonka golaha sharcidejinta.

A. Waxa uu guddoomiyaa fadhiyada golaha sharci dejinta

B. Waxa uu u qeybiyaa doodda xubnaha golaha sharci dejinta

C. Waxa uu ilaaliyaa habsami u socodka shirarka iyo ku dhaqanka dastuurka iyo Xeer-hoosaadyada golaha sharci dejinta

D. Waxa uu guddoomaa soona hordhigaa mooshinada ay soo jeediyaan xubnaha golaha sharci dejinta si waafaqsan dastuurka iyo xeer hoosaadyada golaha

E. Waxa uu ku dhawaaqaa natiijada kasoo baxda codeynta golaha sharci dejinta

F. Waxa uu sii hayaa xilka madaxweynaha xilliga ay dalka ka maqanyihiin Madaxweynaha iyo madaxweyne ku xigeenka.

G. Marka uu Gudoomiyha golaha ka maqanyahay kal-fadhiga ama dalka, waxaa xilkiisa gudanayo gudoomiye ku xigeenka 1aad

H. Hadii Gudoomiyaha iyo ku-xigeenka 1aad ka maqanyihii kal-fadhiga ama dalka, waxaa xilka gudanaya gudoomiye ku-xigeenka 2aad

**Qodobka 44aad**

**Qaab dhismeedka Golaha Fulinta**

1. Golaha Xukuumadda DGGM waxa uu ka koob-mayaa madaxweynaha DGGM, madaxweyne ku-xigeenka iyo Wasiiro.
2. Hanaanka DGGM waxa uu noqonayaa hanaan madaxtooyo (presidential) oo Baarlamaanteeri ah.
3. Golaha xukuumadda waa wadajirka wasiirada/wasiiro xigeeno iyo wasiiro dowloyaasha DGGM Madaxweynaha iyo madaxweye ku-xigeen.

**Qodobka 45aad**

**Madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka DGGM**

DGGM waxay yeelanaysaa Madaxweyne iyo ku xigeen la soo doorto; madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waa la isla dooranayaa, iyadoo doorashada Madaxweynaha la hormarinayo.

**Qodobka 46aad**.

**Shuruudaha Musharaxa madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka**

Waxaa xilka madaxweynaha DGGM isu soo sharixikara muwaadinkasta oo buuxiya shuruudahan:

1. Muwaadin Soomaali ah, kana soo jeeda Gobolada galgaduudiyo mudug DGGM, ahna Muslim guta waajibaadka diiniga ah. .
2. Caafimaadkiisa maskaxeed uu taam yahay.
3. Da'diisu aanay ka yarayn 40 sano kana badneyn 75 sano.
4. In uu leeyahay aqoon aan ka yareyn heer Jaamacad iyo waayo-aragnimo hogaamin iyo maamul khibradeed oon ka yareyn 5 sano.
5. Waa in aan lagu xukumin dambi ciqaabeed.
6. Wa in aanu maxkamadi ku xukun xadgudub ka dhan ah, xuquuqul insaanka

**Qodobka 47aad.**

**Doorashada Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug iyo ku-xigeenkiisa**

(1) Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug waa in ay doortaan Golaha Sharci-dejinta DGGM.

(2) Ugu yaraan saddex meelood labo tirada guud ee Golaha Sharci-dejinta DGGM waa inay joogaan u codaynta doorashada Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug.

(3) Waa in ay murashaxnimadiisa u soo jeediyaan fadhiga Golaha Sharci-dejinta ugu yaraan toban (10) xildhibaan Golaha Sharci-dejinta DGGM ah.

(4) Murashax Madaxweyne kasta waa in uu murashaxnimadiisa gaarsiiyaa Golaha Sharci-dejinta DGGM waana in uu barnamijkiisa doorashada u soo bandhigaa Golaha Sharci-dejinta DGGM, oo markaa ka dib dooranaya iyadoo la raacayo geeddi-socodkan:

   (a) Codeynta doorashada Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug waa qarsoodi;

   (b) Golaha Sharci-dejinta DGGM waxay Madaxweyne u dooranayaan murashaxa ku guuleysta aqlabiyad seddax meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Sharci-dejinta DGGM.

(c) Haddii murashax ku guuleeysan waayo waxaa codayn labaad loo qaadayaa afarta murashax ee ugu cod badan waxaana ku guleeysanayaa Madaxweyninimada Dawlad Gobaleedka Galmudug murashaxa hela aqlabiyad ah seddax meelood laba (2/3) codadka tirada guud ee xubnaha Golaha Sharci-dejinta DGGM.

(d) Haddii murashaxna ku guleeysan waayo codbixinta wareegga laabad waxaa codbixin wareeg seddaxaad loo qaadayaa labada murashax ee ugu cod badan waxaana Madaxweynennimada Dawlad Gobaleedka Galmudug ku guuleysanaaya murashaxa hela cod haldheeri (50+1) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Sharci-dejinta.

(5) Doorashada Madaxwayne Ku-xigeenga DGGM waxaa loo marayaa habraaca doorashada madaxwaynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug

**Qodobka 48aad**

**La Wareegidda Xilka Madaxweyne**

1. Madaxweynuhu waxa uu xilka madaxweynaha la wareegayaa marka la soo doorto, guddiga doorashooyinkuna ay ku dhawaaqaan natiijada rasmiga ah ee codeynta madaxweynaha lana mariyo dhaarta ku cad qodobka 41aad, Madaxweynaha iyo ku-xigenkiisa waxaa dhaarinaya guddoomiyaha maxkamadda sare.
2. Madaxweynaha la doortay waxa uu xafiiska la wareegayaa 30 casho **g**udahooda kadib marka xilka madaxwynanimo loo dhaariyo.
3. Madaxweynaha iyo ku xigenkiisa waxaa loo sameeynayaa xaflad caleemo-saar xilliga dhaarta.

**Qodobka 49aad**

**Mudada Xilka Madaxweynaha**

1. Madaxweynuhu waxa uu xilka hayn karaa mudo 4 sano ah, markalena dib waa loo soo dooran karaa, laba xilli kabadanna lama soo dooran karo.
2. Madaxweynuhu xafiiskiisa iyo deegaanka DGGM kama maqnaan karo wax ka badan 45 bari, Wixii ka badan waxaa loo aqoonsanayaa xil gudasho la’aan joogto ah.

**Qodobka 50aad**

**Awoodaha iyo waajibaadka Madaxweynaha DGGM**

Madaxweynaha DGGM:

1. Waa Hogaamiyaha DGGM iyo madaxa Xukumadda DGGM.
2. Waxa uu metelaa midnimada dadweynaha DGGM.
3. Waxa uu shir guddoominayaa fadhiyada Golaha Wasiiradda.
4. Waxa uu soo dhisaa xukuumadda, magacaabaa wasiirada, xilkana ka qaadaa.
5. Waxa uu magacaabaa saraakiisha sare, xilkana ka qaadaa kadib marka Golaha wasiirada DGGM soojeediyaan.
6. Waxa uu saxiixaa heshiisyada lala galayo dowladgoboleedyada ka midka ah JFS, iyo Dawaladda dhexe ee JFS.
7. Waa taliyaha guud ee Ciidamada Nabad-gelyada ee DGGM.
8. Waxa uu fidiyaa saamaxaad iyo cafis markii uu helo talo-soo- jeedinta hay'adaha garsoorka.
9. Waxa uu u xilsaaran yahay ilaalinta Dastuurka iyo shuruucda heer DGGM iyo JFS.
10. Waxa uu metelaa DGGM iyo shacabka deegaanka.
11. Waxa uu bixiyaa billad-sharaf iyo abaalmarin heer DGGM.
12. Waxa uu saxiixaa xeerarka iyo sharciyada uu ansixiyo Golaha Sharci-dejinta DGGM.

**Qodobka 51aad**

**Luminta Xilka Madaxweynaha**

Madaxweynuhu waxa uu xilkiisa weynayaa marka:

1. Uu geeriyoodo
2. Uu caafimaad ahaan uu xilkiisa u gudankari waayo
3. Uu xilka iska casilo.
4. Iyo in xilka laga qaado.

**Qodobka 52aad**

**Xil kaqaadista Madaxweynaha**



1. Golaha sharcidejinta waxa uu soojeedinkaraa xilkaqaadista madaxweynaha marka uu ku sifoobo in uu si xun ugu xadgudbo Dastuurka DGGM iyo shuruucda JFS.
2. Mowshinka laga keena madaxweynaha, mowshinka waa in ay soo gubiyaan saddax meelood meel golaha sharci-dejinta.
3. Madaxweynaha waxaa xilka looga qaadikaraa labo meelood meel ee golaha sharci-dejintu u codeyaan mowshinka.

**Qodbka 53aad**

**Siihaynta xilka Madaxtooyada**

Xilka Madaxtooyada sida la isugu sii haynayo:

1. Haddii uu madaxweynaha maqanyahay waxa sii haynayo xilka Madaxweyne ku xigeenka,
2. Haddii Madaxweynaha iyo ku xigeenka maqanyihiin waxaa sii haynaayo xilka Gudoomiyha golha sharci-dejinta.
3. Haddii Gudoomiyaha golaha sharci-dejinta maqanyhay waxaa sii haynayo xilka gudoomiye kuxigeenka 1aad ee golaha sharcidejinta.
4. Madaxda kor lagu xusay halmar kama wada maqnaankaraan dalka.

**Qodobka 54aad**

**Xilka Madaxweyne Ku-xigeenka**

1. Waa kaaliyaha Madaxweynaha.
2. Xilka xafiiska Madaxweyne ayuu qabtaa marka Madaxweynuhu ka maqanyahay dalka.
3. Marka madaxweynaha ka maqanyahay DGGM uuna joogo dalka waxa uu xilka qabanayaa haddii madaxweynha qoraal ugu idmo.
4. Madaxweyne ku xigeenka xilka kula wareegay sida ku cad Qodobka 48aad faqrada labaad, waxa uu xilka si rasmi ah usii heynayaa ilaa laga gaarayo xilliga doorashada.
5. Madaxweyne ku-xigeenka waxa uu xilka hayn karaa mudo 4 sano ah, markalena dib waa loo soo dooran karaa, laba xilli kabadanna lama soo dooran karo.

**Qodobka 55aad**

**Golaha fulinta**

1. Golaha fulinta DGGM waxaa soo magacaabo madaxweynaha DGGM.
2. Golaha wasiirada ee uu soo magacabay madaxweynaha waxaa codka kalsoonida ku ansaxinaayo Golaha sharci-dejinta si aqlabiyad hal dheeri ah.
3. Soo magacaabida iyo ansaxintooda waa in ayan dhaafin 45 cisho marka xafiisaka uu la wareego Madaxweynaha.
4. Golaha wasiirada waxaa laga soo magacaabikaraa xubnaha golaha sharci-dejinta iyo banaankaba balse xubintii loo magacaabo Wasiir, Wasiiru dowlo iyo Wasiir ku xigeen, wax ay baneynaysaa xubinimada Golaha sharci-dadinta, sida ku cad Qodobka 30aad farada 4aad ee Dastuurka DGGM.

**Qodobka 56aad**

**Shuruudaha kamid noqoshada golaha wasiirada**

1. Shuruudaha laga doonayo xubinta golaha wasiirada kamid noqoneysa waa:

I. In uu yahay muwaadin DGGM Muslim ah guta waajibaadka diiniga ah.
II. In uu leeyahay aqoon waxbarasho heer jamacadeed iyo waayo aragnimo Shan sano masuuliyad xileed**.**
III. In uu leeyahay ugu yaraan xirfad maamul oo gaarsiisan ilaa 5 sano shaqo
IV. In da'diisu ka yareyn soddon (30) sano.

2. Xubinta loo magacaabo Golaha xukuumadda, waa in ay soo bandhigtaa hantida guurtada iyo maguurtada ay xubintu leedahay.

**Qodobka 57aad**

**Xilka iyo waajibaadka Golaha wasiirada**

1. Golaha Wasiirada waxa ay ka masuulyihiin fulinta siyaasadaha guud ee DGGM.
2. Golaha Wasiiradu waxaay masuul ka yihiin horumarinta dhaqaalaha, arrimaha bulshada, nabadgelyada iyo xasiloonida guud ee DGGM.
3. Dejinta qorshaha guud ee lagu hormarinayo DGGM.
4. Dejinta siyaasad maaliyadeed, iyo maalgelinta deegaanka iyo kobcinta dhaqaalaha.
5. Dejinta miisaaniyad sanadeedka iyo xisaab xirka sanadka.

6. Dajinta hindise sharciyeedyada iyo soo hor-dhigidda golaha sharci-dejinta
7. Diyaarinta iyo ansaxinta xeerarka maamul, iyo soo jeedinta magacaabidda iyo xilka qaadida saraakiisha sare ee DGGM.
8. Xiriirinta DGGM iyo maamullada gobollada iyo degmooyinka DGGM iyo xiriirka dowlad-goboleedyada iyo DGGM.
9. Nidaamka xiriirka iyo wada-shaqeynta waxaa lagu cadeynayaa xeer gaar ah.

**Qodobka 58aad**

**Golaha Guurtida**

Tilmaanta Guud ee Golaha Guurtidda DGGM

1. Golaha Guurtida Dowlad Gobaleed Galmudug oo ah Golaha Odayaasha dhaqanka, waa hay’adda ugu sareysa arimaha dhaqanka, waxaana lagu maamulayaa xeerar ka soo baxa Golaha Xukuumadda DGGM.
2. Golaha Guurtidu waxa uuu xilsaaran yahay xalinta khilaafaadka beelaha iyo arimaha dhaqanka.
3. Xarunta Golaha guurtidu waa magaalo madaxda maamul Gobaleedka Galmud ee Dhuusamareeb.
4. Astaanta Goluhu waa 2laba bokoor & koofi dulsaaran.
5. Golaha Guurtida waxa ay wada shaqayn la leeyihiin Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Maamul Gobaleedka Galmudug. Waxaana nidaaminaya Xeer gaar ah.

**Qodobka 59aad**

**Shuruudaha kamid Noqoshada Golaha Guurtida**

Qofka kamid noqonaya Golaha Guurtida waa in uu yeesho shuruudaha
Hoos ku xusan:-

1. In uu Muslim yahay, kuna dhaqmo diinta Islaamka.
2. In uu yahay madax dhaqameed soo jireen ah anqoonsina ka haysta madax dhaqameedyada beelaha kale.
3. In uu caafimaad ahaan, jir ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
4. In uu yahay qof diinta aqoon fiican u leh, amma oday dhaqan yaqaan ah.
5. Inaanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah, oo maxkamadda horteeda kaga caddaaday.

6. Inuu yahay xilkas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuna toosan yihiin.
7. Uma bannaana qof shaqaale dawladeed ahi inuu isu taago ka mid noqoshadda Golaha Guurtida haddaanu muddada xeerku cayimay ka hor shaqo ka tegid codsan; taas oo in laga aqbalaana ay waajib tahay.
8. Haddii ay baneyso xubin ka mid ah golaha guurtida xubinnimadeeda waxaa soo buuxsanaya xubintaas beeshuu madax dhaqmeedka u ahaa.

## Qodobka 60aad

## Tirada Golaha Guurtida

Tirada Xubnaha Golahha Guurtidu waa 25, oo iska dhex dooranaya guddoomiye iyo Guddoomiye-ku-xigeen iyo guddi hoosaadyo inta uu u baahdo. Goluhu wuxuu yeelanayaa guddi joogta ah oo 9 (sagaal) xubnood ah.

## Qodobka 61aad

## Awoodda Iyo Waajibadka Golaha Guurtida

Waajibaadka Golaha Guurtidu waa sidan:-

1. Goluhu wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta dhaqanka suuban ee bulshada, dhawrista sharciyada la xiriirta arimaha dhaqanka.
2. Xalinta khilaafaadka Beelaha iyo arimaha dib u heshiisiinta
3. Doorashada Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo ku-xigeenkiisa
4. Dejinta Xeer-hoosaadka Golaha iyo ansixintiisa.
5. Kala qaybgalka Golaha sharci dajinta fadhiyada Dastuurku jideey
6. Golaha Guurtidu wuxuu u gudbinayaa Golaha Xukuumadda iyo Golaha Sharci dajinta talooyin iyo tilmaamo ku saabsan hogaaminta siyaasadda dhaqanka.
7. Golaha wax uu yeelanayaa Gudddi hoosaadyo waxaana nidaamin doona xeer u gaar ah
8. Golaha Guurtida waxay awood u leeyihiin in ay wasiirada ama madaxda hay'addaha dawladda ama madaxda sare ee kale ee qaranka ee hawshoodu khusayso ay wax ka weydiiyaan gudashada xilkooda, xogta ay helaan iyo soojeedintoodana Golaha sharci dajinta ay horkeenaan.
9. Waxa kale oo Goluhu awood u leeyahay dhammaan awoodaha uu siiyay Dastuurka iyo xeerarka kale ee Dowlad Gobaleedka galmudug

10. Soo jeedinta xeerarka ku saabsan dhaqanka, ka-talo-bixinta dhaliilaha maamul ee xukuumadda iyo ogeysiintooda golaha sharci dajinta.
11. Ka-gacan-siinta xukuumadda arrimaha la xiriira diinta, nabadgelyada, difaaca, dhaqanka dhaqaalaha iyo bulshada; iyaga oo kaashanaya Wasaaradda Arimaha Gudaha.

**Qodobka 62aad**

**Fadhiga ugu Horeeya ee Golaha Guurtida**

Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Guurtidu wuxuu qabsoomayaa 15 (shan iyo toban) maalmood gudahood ka dib maalitna la soo dhamaystiro xulashadiisa, waxaana furaya oo dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamada sare ee Maamul Gobaleedka Galmudug, waxaana shirkaas guddoominaya xubinta uggu da'weyn inta laga dooranayo guddoomiye rasmi ah iyo ku xigeen.

Kal fadhigiisa ugu horreeya, Golaha Guurtida waxa uu ku ansixinayaa xeer hoosaadka Golaha.

**Qodobka 63aad**

**Waayidda Xubinnimada Golaha Guurtida**

Xubinimada Golaha Guurtida waxa ay waayi kartaa xubinimadeeda:-

1. Haddii ay ku timaado geeri
2. Haddii uu ku dhaco xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo Maxkamad horteed laga cadeeyey.
3. Xil gudasha la,aan joogta ah

**Qodobka 64aad**

**Garsoorka**

1. Garsoorku waa awood ka madax-bannaan hey'adaha sharci-dejinta iyo fulinta, wuxuuna hoostagaa golaha adeega garsoorka ee madaxabanaan DGGM.
2. Garsoorku waa ilaaliyaha iyo dhaqangaliyaha shuruucda DGGM.
3. Hey'adaha garsoorku waxa ay u madax-bannaanyihiin gudashada howlahooda waajibaad ee garsoor.

### Qodobka 65aad

### Qaab-dhismeedka Garsoorka

1. Garsoorka DGGM waxa uu u dhisanyahay habka kala sareynta garsoorka Maxkamadaha.

b. Maxkamadda Sare, oo ah darajada ugu sareysa DGGM.
c. Maxkamadaha Racfaanka ee darajada labaad Gobolada DGGM, gobolkastaa waxa uu yeelanayaa maxkamad rafcaan.
d. Maxkamadaha Gobolka ee heerka darjada koowaad oo ka kooban maxkamadda Degmada iyo tan Gobolka.
e. DGGM ayaa soo saaraya xeerka garsoorka, oo ay ku qeexantahay ikhtisaasaadka maxkamadaha.

### Qodobka 66aad

### Hawlaha Garsoorka

Garsoorku waxa uu u xilsaaranyahay waajibaadkan:

1. U garqaadidda dhinacyada.
2. Dhegeysiga dacwadaha.
3. Ilaalinta Dastuurka DGGM iyo dasturka JFS, iyo shuruucda DGGM iyo kuwa qaranka iyo Qawaaniinta Caalamiga ah.

## Cutubka Afarad

### Qodobka 67aad

### Hay'adaha dowliga ee madaxabanaan

1. Hay'adaha dowliga ee madaxabanaan ee DGGM waa:
   a. Xeerilaalinta guud ee DGGM
   b. Hanti dhowrka guud ee DGGM
   c. Xisaabiyaha guud ee DGGM
   d. Gudiga shaqaalahahaa rayidka ee DGGM

2. Awood, xilalka iyo waajibaadka hey'adaha dowliga ee kor ku xusan DGGM waxa ay ka soo Saarayaa shuruuc khaas u ah hay'ad kasto,

**Qodobka 68aad**

**Gudiyada Madaxabanaan**

1. Gudiyada madaxabanaan ee DGGM waa hay'ado ka madaxbanaan xukuumadda, xakameyn siyaasadeed iyo faragalin lagu sameyn Karin, awoodna u leh in ay u adeegsadaan aqoonta iyo xirfada la xiriirto howlaha u gaarka ah.

2. Gudiyada madaxabanaan ee DGGM marka ay waajibaadkooda gudanayaan waa in ay u feejig-naadaan tixgalinta xuquuqda aadanaha, demoqoraadiyada, islaxisaabtan iyo daahfurnaan.

3. Gudiyada madaxabanaan ee DGGM marnabba ma hoos imaanayaan xukuumada ama heya'daha dowliga, miisaaniyadoodana waxay ku tilmaanaandoontaa madax gooni u ah oo ku dhagan miisaaniyada DGGM.

4. Gudiyada madaxabanaan ee DGGM waxa ay kala yihiin:

a. Gudiga adeega garsoorka
b. Gudiga la dagaalanka musuqmaasuqa
c. Gudiga doorashooyinka
d. Gudiga xuquuqul insaanka
e. Gudiga dib-uheshiisiinta iyo isdhaxgalka bulshada
f. Gudiga amniga DGGM

5. Guudiyada madaxabannaan waxaa soo qadimeysa xukuumadda DGGM, waxaana codka kalsoonida siinaya Golaha sharci-dejinta DGGM.

6. DGGM waxay ka soo saareysaa shuruuc qeexeyso hanaanka lagu aasaasayo guddiyada kor ku xusan awooddooda iyo waajibaadkooda shaqo.

7. DGGM waa in ay guddiyada madaxabanaan ee dastuuriga ah ku dhistaa mudo 12 bilood gudahooda kadib maalinta la anasxiyo dowlada.

# Cutubka Shanaad

## Ciidamada Nabad Gelyada DGGM

### Qodobka 69aad

1. Dowladda DGGM waxa ay yeelaneysaa ciidamo nabadgalyo, Ciidamada DGGM waxa ay kala yihiin:

   a) Booliska DGGM iyo birmadka

   b) Nabad sugidda DGGM

   c) Ciidanka Asluubta ee DGGM

2. Xeer gaar ah ayaa laga soo saarayaa qaab dhismeedka iyo waajibaadka ciidankastaa gudanayo.

3. Waxaa la dhisayaa guddi madax-banaan oo amni oo ka kooban quburo rayid ah.

# Cutubka Lixaad

## Xiriirka Dowlad Gobleedka Gal-mudug iyo JFS

### Qodobka 70aad

DGGM iyo dawlada federalka waxay ka wada hadlidoonaan awood qeybsiga laba dowlo iyo ku heshiinta qeybsiga kheyraadka gobolka iyadoo la raacayo Dastuurka JFS.

# Cutubka Todobaad

## Qodobada Xilliga kalaguurka iyo dhaqangalinta dastuurka DGGM

### Qodobka 71aad

### Ansaxinta iyo wax-kabedelka Dastuurka DGGM

1. Ergada Golaha ansaxinta ayaa si kumeelgaar ah u ansaxineysa Dastuurka DGGM.

2. Golaha sharci-dejinta ayaa awood u leh wax ka bedelka dastuurka.

   **a)** Qodobada ku xusan Cutubka Kowaad iyo Cutubka labaad ee xuquuqul insaanka, wax ka badalkooda waxa uu u baahnayahay Afti dadweyne.

b) Qodobada wax ka beddelidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara afar meelood meel golaha sharci-dejinta, waxaana ansixinaya labo meelood meel hal dheeri ah ee xubnaha Golaha sharci-dejinta ee DGGM. Marka laga reebo qodobada ku xusan xarafka (a) ee qodobkaan.

c) Golaha sharci-dejinta DGGM waxkabadalka qodobada dastuurka ay ku sameyso sida ku xusan Qodobka 71-aad faqradda 2-aa (b), waxaa loogu dhaqmayaa si kumeelgaar ah inta dastuurka afti dadweyne looga ansaxinayo.

**Qodobka 72aad**

**Dhaqangalka Dastuurka DGGM**

1. Dastuurkan wuxuu uu awood dhaqangal kama dambeys ah yeelanayaa marka afti dedweyne loo qaado cod aqlabiyad ahna loogu codeeyo.

2. Dastuurkaan waxa uu dhaqangal ku meelgaar ah yeelanayaa marka ergada Golaha ansaxinta ku ansaxiso cod aqlabiyad ah.

3. Golaha sharci-dejinta DGGM fadhiga ugu horeeyo waa in ay ku soo saaraan mowshin lagu dhaqangalinaayo dastuurka DGGM, cod aqlabiyad ahana lagu ansaxiyo.

4. Mudada hirgalinta aftida dadweynaha ma dhaafikarto 3 sano.

**LIFAAQYO (ANNEXES):**

**LIFAAQA ERGADA ANSAXINTA DASTUURKA DGGM**

**LIFAAQA (A):**

**1- Calanka DGGM**



**2- Astaanta DGGM**



**3- In erayada lasoo gaabiyey ee Dastuurka kujira loola jeedo sida ku hor qoran:**

a. JFS: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
b. JDFS: Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Federaalka Soomaaliya
c. DGGM: Dawlad Gobaleedka Galmudug
d. DJFS: Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
e. KMG: Kumeelgaar